Waa maxay lacag bixintani?

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) waxay soo saaraysaa lacag bixin dheeraad ah oo hal mar ah oo la siinayo sidaryeel bixiyayaasha qoyska ee ruqsad haysashada laga dhaafay kuwaasi oo daryeel bixinayay muddada uu cudurka baahsani jiro. Lacagta waxaa mid la heli karo ka dhigay oo ay ka socotaa Sanduuqyada Dhaqaale ee Gargaarka Coronavirus ee federaalka.

Miyaan u qalmaa in aan helo lacag bixintani dheeraadka ah?

Si loogu qalmo, daryeel bixiyayaasha carruurtu waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda muddo aan ka dambeyn Noofambar 13, 2020:

- Noqdaan daryeel bixiyayaasha qoyska ee ruqsad haysashada laga dhaafay - oo sidoo kale loo yaqaano daryeel bixiyayaasha Qoyska, Saaxiibka iyo Xaafada
- Yihiin kuwo hadda qoran oo xaalad shaqaynaysa oo la oggolaaday la leh ODHS
- Heleen lacag bixin loogu talagalay daryeelka carruurta ee la bixiyay bilaha Abriil, Maajo, Juun, Luulyo, Ogoosto, Sibtambar, Oktoobar ama Noofambar ee 2020 muddo aan ka dambeyn Noofambar 13-keeda.

Miyaan u baahanahay in aan codsado helida lacagta?

Ma jiro codsi loo baahan yahay oo loogu talagalay lacag bixintani. Daryeel bixiyayaasha aqoonta leh ayaa si toos ah loo siin doonaa lacag inta u dhaxaysa Diisambar 4 iyo Diisambar 10, 2020.

Lacag intee le’eg ayay daryeel bixiyayaashu heli doonaan?

Warqad ayaa lagu soo diray boosta 11/30 oo tilmaamaysay in heerka lacagta caadiga ah ee la bixiyo ay noqon doonto $2,090 iyada oo daryeel bixiyayaasha aan lacagaha gargaarka degdega ah ee daryeelka carruurta helin iyaga oo adeegsanaya Waaxda Waxbarashada, Waxbarashada Hore ee Dhallaanka ay heli doonaan lacag dheeraad ah oo dhan $465 oo gaaraysa isugeyn dhan $2,555. ODHS ayaa is waafajisay tirada lacag bixinta iyada oo sababtu tahay daryeel bixiyayaal intii hore ka yar oo u qalma marka loo eego intii asal ahaan la filayay. Heerka lacagta caadiga ah ee la bixiyo ayaa la kordhiyay oo la gaarsiiyay $2312 taasi oo ay ku jirto lacag dheeraad oo lagu kordhiyay oo dhan $530 oo gaaraysa isugeyn dhan $2842.

Waa maxay sababta aan u helay warqad haddii aanan daryeel carruurreed bixinayn tan iyo ka hor Abriil 2020?

Liiska bilowga ah ayaa lagu daray daryeel bixiyayaasha qaarkood oo joojiyay bixinta daryeelka carruurta ka hor cudurka baahsan. Xaaladahooda ayaa dib u eegis lagu sameeyay waxaana la ogaaday in aysan u qalmin kharashyada la xiriira daryeelka carruurta. Daryeel bixiyayaashani ayaa si kala gooni ah loo ogeysiiyay in aysan u qalmaynin lacag bixinta.

Waa maxay sababta lacagahani loo bixiyay?

Lacagaha waxaa loo bixiyay si ay gacan uga geysato taageerada daryeel bixiyayaasha galay kharash uu sababay bixinta daryeelka carruurta inta u dhaxaysa Abriil 1, 2020 iyo Diisambar 30, 2020. Kharashyada waxaa ku jiri kara ijaarka, mortgage-ka, adeegyada 'utilities', caymiska, cuntada, agabyada, iwm.

Waxaan ahay daryeel bixiye ruqsad ka haysta Waaxda Waxbarashada, Xafiiska Daryeelka Carruurta (OCC). Miyaan u qalmaa in aan helo lacag bixintani?

Maya. Waaxda Waxbarashada, Xafiiska Daryeelka Carruurta ayaa helay $33.1 milyan oo ah dhaqaale loogu talagalay daryeel bixiyayaasha ruqsada haysta iyo sidoo kale hay'adaha wax codsanaya iyo barmaajiyada diiwaan gashan. Sidaa darteed, daryeel bixiyayaasha ruqsada haystaa uma qalmaan lacag bixintan dheeraadka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan lacagahani booqo: https://oregonearlylearning.com/COVID-19-Resources/Grants.

Waxaan bixiyay daryeel carruureed tan iyo Maarso 2020. Miyaan u qalmaa lacag bixin dheeraad ah?

Maya. Lacagahani waxaa la siisay daryeel bixiyayaasha sida firfircoon u bixinayay daryeelka carruurta tan iyo markii ay bilaabantay Xaalada Degdega ah ee cudurka COVID 19. Maadaama daryeel bixiyayaal badani joojiyeen bixinta daryeelka carruurta bilawgii cudurka baahsan bartamihii Maarso, daryeelka carruurta ee la bixiyay Maarso looma tixgelin lacag bixintani dheeraadka ah.

Goorma ayaa lacagta la bixin doonaa?

Lacag bixin toos ah ayaa daryeel bixiyayaasha u qalma oo dhan la siin doonaa Diisambar 4, 2020.

Sidee baa lacagaha loo heli doonaa?

Waxaad lacag bixintani u heli doontaa hab la mid ah sida aad u hesho lacagahaaga joogtada ah ee bishii ee loogu talagalay daryeelka carruurta ee ODHS. Daryeel bixiyayaasha hela lacagaha iyaga oo adeegsanaya lacagta sida tooska ah la iskugu soo shubo waxay heli doonaan lacag bixintani iyada oo ah lacag si toos ah la iskugu soo shubayo. Daryeel bixiyayaasha hela lacagaha iyada oo ah jeeg caadi ah 'physical check' waxay heli doonaan lacag bixintani iyada oo ah jeeg caadi ah 'physical check'.

Miyaan u baahanahay in aan waqtiga qaarkiis jeega ka dhigto lacag caddaan ah?

Dhaqaalaha waxaa loo isticmaali karaa kharashyada yimiday inta dhaxayso Abriil 1 – Diisambar 30, 2020. Daryeel bixiyayaasha helay jeega caadiga ah 'physical check' waxay haysan doonaa ilaa Maarso 30, 2021 si ay lacag caddaan ah uga dhigtaan jeegooda. ODHS waxay daryeel bixiyayaasha ku dhiirigelinaysaa in ay lacag caddaan ah ka dhigtaan jeegaga muddo aan ka dambeynin Diisambar 31, 2020.

Miyay lacag bixintani tahay mid canshuur laga qaadi karo?

Lacag bixintani waxaa dhici kara in laga qaado canshuur. Fadlan la tasho maamulahaaga canshuurta.

Miyaa lacag bixintani lagu dari doonaa 1099 aan leeyahay dhammaadka sanadka?

Haa. Lacag bixintani waxaa lagu dari doonaa foomamka canshuurta ee 1099 ee loogu talagalay 2020. Foomamka 1099 waxaa sanad kasta la soo saaraa dhammaadka Janaayo.

Waa maxay meesha laga helay dhaqaalaha lacag bixintani dheeraadka ah?

Lacag bixinta dheeraadka ah waxaa dhaqaalihiisa bixiyay Sanduuqa Dhaqaale ee Gargaarka Coronavirus ee federaalka.

Ma doonayo in aan helo lacag bixintani. Sidee baan u diidaa?

Kooxda Lacag Bixinta Tooska ah (DPU) isla markiiba kala xiriir 800-699-9074 ama CustomerService.DPU@dhsoha.state.or.us.

Ma aan helin lacag bixin. Ayaan la xiriiraa si aan u hubiyo in ay tani sax tahay?

Daryeel bixiyayaasha u qalma ayaa boosta warqad loogu soo diray Noofambar 30, 2020, iyada oo daryeel bixiyayaasha leh email faylka ku jirta, email loo soo diray Diisambar 1, 2020. Haddii aadan helin wada xiriir ku saabsan lacag bixin oo aadan helin jeeg ama lacagta sida tooska ah la iskugu soo shubo oo aad aaminsan tahay in ay ahayd in aad u qalanto lacag bixinta, fadlan DPU kala xiriir 800-699-9074 ama CustomerService.DPU@dhsoha.state.or.us.